

Naga Caawi Sidii aanu u Abuuri lahayn Dugsiga Sare ee Madison oo La Casriyeeyay

Raadinta Ka qayb qaadashada Bulshada

Ka dib xeerkii maalgelinta daymeed ee 2017-ka, PPS waxay hore u sii wadaa qorshaynta, naqshadeynta iyo dhismaha Dugsiga Sare ee Madison oo la casriyeeyay. Qorshaha weyni wuxuu ku baaqayaa in qaybo ka mid ah dhismaha 60 sano jirka ah ee Madison dib loo cusboonaysiiyo iyo in la dhisho xarumo cusub. PPS waxay raadinaysaa talooyinka dadweynaha oo ku saabsan sida ay tahay in Madison cusub loo naqshadeeyo isla markaana waxay raadinaysaa tabarucayaal ku soo biira Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Madison (DAG).

Ku soo biir Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Madison (DAG)

Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Madison waxaa ka mid ah waalidiinta, macallimiinta, ardayda, iyo wakiilada bulshada kuwaasi oo ku lug yeelan doona horumarinta naqshadeynta Dugsiga Sare ee Madison ee cusub. Kooxda waxaa ka mid noqon doona ugu yaraan hal xubin oo oo matalaya mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda: waalidiinta dugsiga sare, waalidiinta xaafada, waalidiinta dugsiga laga imaanayo, dugsururada xaafada, ururada ganacsiga, barnaamijyada dugsiga, goobta




suurtagalka ah iyo/ama hawl wadaagayaasha lacageed, ardayda, iyo macallimiinta iyo wakiilka guddiga dugsiga.

Hawsha Kooxda La Talinta Naqshada

Ujeedada DAG waa horumarinta qorshaha dugsiga sare oo dhammaystiran, sinnaansha leh, isku-dhafan isla markaana leh aragti leh oo la kaashanayo ka qayb qaadashada bulshada dugsiga ee dhabta ah. Xubnaha waxaa laga fili doonaa in ay shaqeeyaan dhowr bilood inta lagu jiro nidaamka qorshaynta.

Ka qayb qaado isla markaana La socio Waxa jira

Ku soo biir Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Madison, codsiga halkan ka soo minguuri 'download': <http://MadisonBond.pps.net>. Haddii aadan awoodin in aad ku biirto DAG, waxaad weli fursad u heli doontaa in codkaaga lagu dhageysto Kulanka Nashqadeynta Dadweynaha ee Madison ee soo socda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo macluumaadkii u dambeeyay booqo website-ka mashruuca <http://MadisonBond.pps.net>. Ku soo biir liiska boostada ee mashruuca MadisonBond@pps.net.



BARNAAMIJKA MAALGELINTA DAYMEED EE DUGSIYADA DADWEYNAHA PORTLAND

<http://MadisonBond.pps.net> • 503-916-2222 • www.facebook.com/pps.homepage • [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect)

Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay